IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA

# الرسمية الجريدة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 12aad Muqdisho 18 Maarso 1984 L. 1 R 3

لجمهورية الصومال الديمقراطية

BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku wamaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

## QAYBTA KOWAAD

## S H A R C I

SHARCI L. 9 ee 11 Jen 1984, Oggolaansho BOG. Heshiis Dhexmaray J.D.S. J. Carabta ee Yaman wax wada qabsi xagga Ganacsiga Shaqaalaha iyo Beeraha 194

SHARCI L.10 ee 15 Jen. 1984, Mihnadda gaarka ee ah Takhrtanmada. » 195

SHARCI L. 11 ee 21 Jen. 1984, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 1 ee 1da Jen. Fasax qalab ka keenid dibadda oo ku meel gaar ah. » 202

SHARCI L. 12 ee 21 Jen. 1984, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 2 ee 7da Jen. 1984, Sharciga Can/ta Gadidda. » 203

Wakaaladda M. Qoranka

Sharci lambar 10 taariikh 15 Jen· 1984 Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada·

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga·

WUXUU SOO SAARAYAA: Sharciga Soo Socda:

Qod. 1aad

(Did u Furidda Mihnadda)

Waxaa dib loo furay Mihnadda gaarka ah ee Tahk/da·

Qod· 2aad

(Ujeedada dib u furidda)

Ujeedada dib u furidda Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada waxaa weeye in Takhaatiirtu waqtiya da ka baxsan saacadaha shaqada ay u faa'iideeyaan Dadweynaha u dhibaateysan gargaarkooda, lana siiyo fursad ay sare ugu qaadaan aqoontooda cilmiyeed iyo Farsamo·—

Qod· 3aad

(Dadka loo oggolyahay Mihnadda)

Mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada waxaa ku shaqaysan kara Takhaatiirta Dawladda, waqtiyada ka baxsan saacadaha shaqada, iyo kuwa hawlgabka ah ee oofiya shuruudaha ku tilmaaman Qodobada soo socda:

Qod· 4aad

(Shuruudo)

Qofka Mihnadda gaarka ah ee takhtarnimada ku shaqaysanaya waa in uu b xiyaa shuruudaha hoos ku taxan·—

a) In uu Soomaali yahay·

b) In uu haysto Shahaado Jaamacadeed (laurea) ee daaweynta iyo qalliinka oo Dalka laga aqoonsan yahay·—

t) In uu leeyahay khibrad takhtarnimo aan ka

Qod. 5aad

(Bixinta Fasaxa)

1. Takhtarka buuxiya shuruudaha Sharcigan ku tilm aaman ee raba in uu ku shaqaysto mihnidda Takh tarnimada, wuxuu Wasiirka Wasaaradda Caafimaa dka u qoranayaa codsi.

2. Codsiga waa in lagu soo lifaaqaa.

a) Laba Masawir.

b) Nuqul Shahaadada Jaamacadda iyo haddii uu leeyahay, Shahaadada Takhasuska.—

t) Caddeynta khibradda oo ay bixisay hay'ad aw ood sharci u leh, iyo

j) Qoraal gaar ah oo tilmaamaya meesha ay ku taal goobta bukaan eegtada iyo qalabka yaalla.—

Qod. 6aad
(Oggolaasho)

1. Wasiirka Wasaaradda Caafimaadku, markuu dhegeysto talada Guddiga latalinta iyo Kormeerka ee Wasaaradda, ayna u sugnaato in Codsadaha u dhame ystiran yihiin shuruudaha sharcigani tilmaamay, wu xuu bixinayaa fasaxa mihnadda gaarka ah ee Takhtar nimada.

2. Wasiirku wuxuu codsiga ku diidi karaa go'aan sababeysan oo kama dambeys ah, waxaana go'aanka la gaarsiinayaa codsadaha 15 maalmood gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka.

Qod. 7aad
(Shati)

1. Mihnadda gaarka ah ee takhtarnimada waxaa loo qaadanayaa Shati.

2. Shatiga waxaa bixineysa Dawladda Hoose ee Degaanka Takhtarku ka furanayo bukaan eegtada.

3. Dawladda Hoose waxay shatiga siin kartaa Ta

Qod. 8aad

(Goobta)

1. Goobta lagu fulinayo shaqada takhtarnimada waa in ay noqotaa mid xagga nadaafadda, caafimaad ka, dhismaha iyo degaankaba u qalanta Mihnadda.

2. Goobtu waa in ay ka koobnaataa, ugu yaraan, qol baaris, qol fadhi (sala d'aspetto) iyo musqul, lahaa tana biyo socda.

3. Waxaa reebban in ay noqoto FARMASHIYE dhexdiisa.—

Qod. 9aad

(Astaan gaar ah)

1. Takhtarku wuxuu warbixinnadiisa, codsiyada iyo tilmaanta Daawada (ricetta medica) u sameysana yaa warqado gaar ah oo ku daabacan magaciisa, takha suskiisa iyo cinwaanka goobta shaqada.

2. Waxaa reeban isticmaalidda warqadaha Isbi taallada ama xarumaha Caafimaadka ee Dawladda ee uu ka shaqeeyo Takhtarku.

3. Wuxuu kaloo sameysanayaa Diiwaan lagu qoro bukaanka uu eego.

Qod. 10aad

(Khidmadda)

1. Khidmadda takhtarka waa Sh.So. 50 (konton) halkii eegisba.

2. Bukaanka wax lacag ah lagu yeelan maayo had dii muddo 10 maalmood gudahooda isla xanuunkii ugu laabto Takhtarka.

3. Tacriifada kor ku tilmaaman waxaa lagu bed deli karaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la dhegeystay soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka iyo Gola ha Wasiirrada.

Qod· 11aad

(Fasax ka qaadid)

1· Fasaxa Wasaaradda ee Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada waxaa laga qaadayaa Takhtarkii.

a) Lumiya shardi ka mid ah shuruudihii saldhigga u ahaa bixinta fasaxa·

b) Ku dhaco xukun Maxkamadeed oo ka reebaya gudasho xil guud ama inuu ku shaqaysto mihnad ama xirfad·

t) Si buuxda oo habboon uga gudan waaya waajibaadkiisa goobaha shaqada ee Dawladda ama u hoggaansami waaya awaamiirta Wasaaradda Caafimaadka ee la xiriirta habeynta mihnadda gaarka ah ee Takhtarnimada·

j) Ku xadgudba anshaxa takhtarnimada (medical ethics)·

2· Fasax qaadidda waxaa lagu guddoominayaa go'aan sababeysan oo Wasiirku soo saaro, isagoo dhegeystay talada Guddiga latalinta iyo Kormeerka ee Wasaaradda·

Qod. 12aad

Diiwaanka Mihnadda)

1· Waxaa jiray Diiwaan lagu magacaabo Diiwaanka Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada·

2· Diiwaanka waxaa lagu qorayaa magaca takhtarka oo buuxa, shahaadooyinkiisa, taariikhda fasaxa la siiyey, goobta iyo hadba isbeddelka ku dhaca iyo wixii kaloo tilmaamo ah ee Mihnadda khuseyn kara·

Qod· 13aad

(Guddiga latalinta iyo Kormeerka)

1· Wasaaradda waxaa laga dhisayaa Guddi Latalin iyo Kormeer oo ka kooban Agaasmaha Guud ee Wasaaradda, Agaasimaha Waaxda Daawada, Agaasimaha

Waaxda Takhaatiirta yo Laba Takhtar oo Wasiirku magacaabo, sannadkiiba hal mar, lagana dhex xuley Takhaatiirta waayo aragnimada leh ee Dalka.

2. Guddigu wuxuu talo ka bixinayaa cods yada Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada iyo anshaxm arinta Takhaatiirta ku shaqesata mihnaddaas.

3. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu talo ka soo Jeediyo, toos ah, goobtii ama Takhtarkii uu u arko in ayan buuxineynin shuruudaha Sharcigan ku til maaman, una gudbiyo Wasiirka, si looga qaado tallaa bada ku habboon.

Qod. 14aad

(Ciqaabaad)

1. Takhtarkii ku xadgudba tilmaamaha Sharcigan lagu jideeyey, haddii falkiisu uusan keeneynin dembi ciqaab ah ama ka jooj n Mihnadda Takhtarnimada ee Gaarka ah, waxaa lagu ganaaxayaa Sh.So. 10.000.

2. Haddii Takhtarku isla dembiga mar kale uu ku laabto, Mihnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada waxaa laga joojinayaa muddo aan ka yareen hal sano, kana badneen saddex sano.

3. Awoodda anshaxmarinta kor ku tilmaaman waxaa leh Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka, wuxuu na ku guddoominayaa go'aan sababeysan, isagoo dhe geystay Guddiga latalinta iyo Kormeerka ee Wasaarad da.

4. Lacagta ganaaxa waxaa lagu shubayaa Khas nadda Dhexe ee Dawladda.

Qod. 15aad

(Xeer Nidaaminta)

Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka waxaa awood loo siiyey in uu Xeer Nidaamiye ku soo saaro tilmaa mo dhammeystiraya habeynta Mahnadda Gaarka ah ee Takhtarnimada, isagoo dhowraya Axkaanta Sha/gan

Qod. 16aad

(Burrin)

Waxaa la burriyey Sharciga tirsigiisu yahay 23 ee 2da Maarso 1972 iyo Sharci ama Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 17aad

(Dhaqangal)

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 15 Gen. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre